Taleefan: 0300 3000 007
Iimayl: communityimmunisations.service@nhs.net

Leicestershire Partnership NHS Trust
**A university teaching and research-active Trust**
Bridge Park Plaza
Bridge Park Road
Thurmaston
Leicester
LE4 8PQ
www.leicspart.nhs.uk

Sebteember 2022

Waalidka/Daryeelaha iyo Dhallinka qaaliga ah,

**Tallaalka hergab xilliyeed ee sannadlaha ah**

Dhammaan carruurta iyo dhalinyarada laga bilaabo barbaarinta ilaa fasalka 9-aad waxaa dugsiga lagu siinayaa talaalka hergabka ee ay bixinayso Iskaashiga Leicestershire ee Adeegga Talaalka Bulshada ee NHS Trust, taasoo qayb ka ah barnaamijka talaalka qaranka.

Hergabku wuxuu noqon karaa jirro aan wanaagsanayn oo dadka qaar ayaa u bukoon kara. Tallaalka hargabku waxa uu ka ilaaliyaa hargabka xilliyeed (ifilada) oo waxa kale oo uu kaa caawin doonaa ka hortagga faafitaanka hargabka, isaga oo ka caawinaya badbaadada dadka kale ee nugul.

Tallaalka waxaa loo qaataa qaab sanka la iskaga buufiyo ama cirbad aan jelatin-lahayn. Si aad wax badan uga ogaato tallaalka, booqo: tiny.cc/fluvaccination ama daawo muuqaalkeena: www.healthforkids.co.uk/staying-healthy/stopping-flu

**Waxaan kaliya siin doonaa ilmahaaga tallaalka hargabka haddii aan ogolaanshahaaga haysano.** Fadlan sida ugu dhaqsaha badan u samee sidaa, adigoo isticmaalaya tilmaamaha hoose. Waxa aad u baahan tahay in aad hal mar un soo gudbiso go'aankaaga.

## Sida loo bixiyo ogolaanshaha si ilmahaaga uu u helo tallaalka hargabka

- Qor koodhka dugsigaaga. **Beaumont Lodge Primary School**, koodka dugsigu waa **LE120087**
- Buuxi foomka ogolaanshaha onlaynka adiga oo booqanaya**:** **www.leicsandrutlandimms.co.uk** ama sawir ka qaad koodhka QR adigoo isticmaalaya kamarada taleefankaaga si aad toos ugu tagto websaydhka.
- Dooro **Seasonal Flu** oo geli koodhka dugsiga.
- Bogga caddaynta oggolaanshaha, waxaad ku oggolaan kartaa mid ka mid ah tallaalka sanka ee hargabka **ama** tallaalka hargabka la isku duro ee jelatin-lahayn.
- Waxaad heli doontaa iimaylka xaqiijinta marka foomka la gudbiyo.

Haddii aad dhib ku qabto onlayn ku buuxinta foomka, fadlan naga soo wac: **0300 300 0007** ama iimayl noogu soo dir **Communityimmunisations.service@nhs.net** Haddii aad go'aankaaga oggolaansho bixinta fadlan naga soo wac lambarka kore si aad u bedesho.



disability confident EMPLOYER

Dugsigaaga ayaa ku ogeysiin doona marka kulanka tallaalka la qabanayo. Nidaamka oggolaanshaha wuxuu xirmi doonaa hal maalin shaqo ka hor kulanka. Ma awoodi doontid inaad soo gudbiso foomka oggolaanshaha maalintaas.

| | |
|---|---|
| Waa maxay tallaalka hargabka ee ilmahayga la siinayo? | Tallaalka hargabka sanka ayaa loo qaataa si degdeg iyadoo aan xanuun lahayn oo sanka ayaa lagu buufiyaa. Waxa kale oo loo bixiyaa sidii cirbad gelatin-lahayn, maadaama carruurta qaarkood aanay awoodin inay tan ku qaataan sababo caafimaad awgeed ama doorbidid qofeed awgeed maadaama ay jelatin lahayn. Waa muhiim in la ogaado in cirbaddu ka waxtar yar tahay tallaalka hargabka sanka laga qaato. |
| Ilmahaygu waxa uu leeyahay xaalad caafimaad waxana uu sida caadiga ah tallaalka ka helaa GP-ga. | Waxay kaloo awoodaan inay tallaalka ku qaataan dugsiga. |
| Ilmahaygu ma awoodo inuu qaato tallaalka hargabka sanka sababo caafimaad dartood. | Kooxdayadu waxay dib u eegi doonaan macluumaadka caafimaadka ee la soo gudbiyay waxayna ka doodi doonaan u qalmidooda waxayna bixin doonaan tallaalka hargabka la isku duro haddii loo baahdo. |
| Halkeen ka akhriyi karaa buug-yaraha badeecada ee tallaalka? | Wixi ku saabsan tallaalka hergabka ee sanka laga qaado, booqo: www.medicines.org.uk/emc/files/pil.3296.pdf<br>Wixi ku saabsan tallaalka hergabka ee la isku duro, booqo: www.medicines.org.uk/emc/files/pil.12882.pdf |
| Waxay sheegaysaa in ciwaanka iimaylka iyo koodhka iskuulka aynan is lahayn ama aqoonsanayn koodhka dugsiga. | Hubi in aanay jirin meel bannaan ama calaamado ka hor ama ka dib ciwaanka iimaylka iyo koodka dugsiga. |
| Maxaa dhacaya haddii ilmahaygu maqan yahay ama uu xanuunsanayo maalinta kulanka? | Fursad dheeri ah ayaa loo heli doonaa tallaalka waxaana faahfaahinta lagu soo diri doonaa iimayl. |
| Waa maxay barnaamijka talaalka qaranku? | Booqo: www.nhs.uk/conditions/vaccinations si aad u ogaato wax badan. |

Si daacadnimo leh,

Adeegga Talaalka Bulshada

**Haddii aad jeclaan lahayd inaad warqadan ku akhrido luqad kale, booqo:**
**www.leicspart.nhs.uk/communityimms**

| | |
|---|---|
| Carabi | ذا كنت ترغب في قراءة هذه الرسالة بلغة أخرى، قم بزيارة موقعنا على الإنترنت |
| Gujarati | જો તમે આ પત્ર ગુજરાતીમાં વાંચવા માંગતા હો તો અમારી વેબસાઈટ પર જાઓ |
| Boolish | Jeśli chcesz przeczytać ten list w innym języku, przejdź na naszą stronę. |
| Bunjaab<br>i | ਜੇ ਤੁਸੀਂ ਇਸ ਪੱਤਰ ਨੂੰ ਕਿਸੇ ਹੋਰ ਭਾਸ਼ਾ ਵਿੱਚ ਪੜ੍ਹਨਾ ਚਾਹੁੰਦੇ ਹੋ ਤਾਂ ਸਾਡੀ ਵੈੱਬਸਾਈਟ 'ਤੇ ਜਾਓ |

| | |
|---|---|
| Soomaali | Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku akhrido warqadan luuqad kale, booqo boggayaga internetka |
| Urduu | اگر آپ اردو میں یہ خط پڑھنا چاہتے ہیں تو ہماری ویب سائٹ پر جائیں۔ |

**Haddii aad jeclaan lahayd inaad ku akhrido xaashida tallaalka hargabka luqad kale, booqo: [www.gov.uk/government/publications/flu-vaccination-leaflets-and-posters](http://www.gov.uk/government/publications/flu-vaccination-leaflets-and-posters)**

Luqadaha la heli karo waxaa ka mid ah: Ingiriis, Albaaniyaan, Carabi, Bengal, Bulgaariya, Shiinees (aan rasmi ahayn), Shiinees (rasmi ah, Cantonese), Istooniyaan, Farsi, Faransiis, Giriig, Gujarati, Hindi, Latvia, Lithuanian, Bunjaabi, bashto, Boolish, Burtuqiis, Roomaaniyaan, Romany, Ruush, Soomaali, Isbaanish, Tagalog, Turki, Twi, Yukreeniyaan, Urduu iyo Yiddish.

Waxa kale oo looga heli karaa websaydhka isagoo ah Luqadda Dhagoolaha Ingiriiska (BSL) iyo nooca  maqalka keliya ah.